

Waxay sameyn karto ACCC

- > Sii macluumaadkaaga ku saabsan xuquuqda iyo waajibaadka isticmaalaha.
- > Soo jeedi tallaabo suurto gal ah oo aad qaadi karto.
- > Waxay kaa caawineysaa inaad go'ansato u cabashada wakaalad kale.
- > Waxay ku siineysaa alaab kala duwan oo ka hadleysa macluumaadka isticmaalaha oo kuu sharxaya xuquuqda isticmaalaha.
- > Baar falka ganacsiga ee ka dhacaya qaran ahaan ama xadadka gobolka oo dhan (Waxa wannagsanaan lahayd in cabashooyinka khuseeya ganacsatada deegaanka lagu xaliyo xafiisyada ganacsiga loo siman yahay ee Territory-ga iyo gobolada).

Waxay qaban karo ACCC

- > Baarida falka jahawareerka leh iyo khiyaanada ee adeegyada lacagta. Waxyaalahan la saluugsan yahay waa in lagu soo hagaajiyaa Australian Securities and Investments Commission (wac 1300 300 630 ama visit www.fido.gov.au).
- > Guud ahaan kuma lug yeeshaan muranada heshiiska gaarka ah iyagoo metelaya isticmaalayaasha (tusaale, kuwa khuseeya cabashooyinka dammaanada).
- > Waxay bixiyaan tallo aqoon leh oo sharciyeed, ama waxay kuu sheegayaan intee ama cabashooyinka nooc ee ah ee aan ka helnay shirkada.

Xirriirada ACCC

ACCC Infocentre 1300 302 502

ACCC Indigenous Infoline 1300 303 143

Wixii macluumaad ah ee afafka aan aheyn Ingiriiska wac
131 450 weydiisana in lagu waca **1300 302 502**

TTY adeega loogu talagalay dadka hadalka iyo maqalka dhibi
ka heysato ee **1300 303 609**

ACCC Infocentre shaqaalaha ee waa diyaar si ay kuga
jawaabaan wacitaankaaga inta lagu jiro saacadaha shaqada
ee caadiga ah.

www.accc.gov.au

© Commonwealth of Australia 2007

ISBN 978 1 921393 06 8

Produced by the ACCC 07/07
Somali



Australian
Competition &
Consumer
Commission

Ogow sidii aad u cabban laheyd U istaag xuquuqdaada isticmaale ahaan

Know how to complain
Stand up for your consumer rights



Tusahan ayaa sheegaya:

- > Xuquuqdaada isticmaale ahaan.
- > Tallaabooyinka aad qaadeyso haddii aad dooneysid inaad xaliso muran ganacsi.
- > Faahfaahinta xirriirka iyo doorka ACCC.
- > Wakaaladaha kale iyo qorshayaasha xalinta muranka ee wax caawin kara.

Xuquuqdaada isticmaale ahaan

Ganacsiga daacada iyo cadaalada ah

Ganacsiyadu waxay jebinayaan sharciga haddii ay:

- > Ay ku jaahwareeriyaan ama ku khiyaamaan, ama sameeyaan wax laga yaabo inay ku jahawareeriso ama ku khiyaanto.
- > Ay sameeyaan sheegasho been ah oo ku saabsan, tayada, heerka, kafaalashada, ogolaanshaha, qiimaha ama faa'iidada adeeg ama badeeco.
- > Ku xayeysiyaan wax qiimo haddii ay ogyihiin ama ay tahay inay ogaadaan inayan ku heli Karin wakhti macquul ah (xayeysiin soo jiidasho leh).
- > Aqbalaan lacag bixinta badeeco ama adeeg iyagoon dooneynin inay keenaan.

Wixii dabecad ah ee tan la xirriira waa sharci darro marka loo eego *Trade Practices Act 1974* (the Act) iyo sharciga u dhigma ee gobol kasta iyo territory-gaba. ACCC waxay masuul ka tahay dhaqangelinta the Act.

Haddii aadan hubin xuquuqdaada iyo waxa ganacsiyada looga baahan yahay inay sameeyaan sharci ahaan, wac xafiiska gobolka ama territory-ga aad degan tahay ee ganacsiga siman ama ACCC Infocentre wixii caawinaad ah (eeg xirriirada ACCC wixii faahfaahin ah).

Sidii aad u caban laheyd

Tallaabada 1: U tag ganacsiga aad saluugsan tahay

La xirriir ganacsiga si aad u sharaxdo dhibaataada iyo natiijada aad dooneyso (tusaale lacag celin ama bedelaad) – badanaa waxaa tan ku filan inaad taleefan u soo dirto ama inaad bakhaarka adigu booqato. Warkaagu ha caddaado, kuna adkeyso, deganow edebna lahow. Qor dhammaan taleefanada iyo booqashooyinka aad ku tagto ganacsiga, oo ay ku jiraan magaca qofka aad la hadasho. Haddii aysan tallaabadani shaqeyn, ugub talaabada 2.

Tallaabada 2: Samee cabasho qoraal ah

U qor ganacsiga – cinwaan u samee warqadaada ama iimeyl u dir maareeyaha ama xarunta shirkada. Sheeg waxaad ka cabaneyso iyo natiijada aad dooneysid (sida tallaabada 1). Weydii jawaab ganacsiga laba toddobaad gudahood, laakiinse xasuuso inaad taariikh u sameyso waraaqaha kuna dar meeshii lagaala soo xirriiri lahaa. Ku dar wixii macluumaad ah ee taageeraya (sida risiidada ama xayeysiinta), laakiinse hayso waraaqaha asalka ah. Sidoo kale ka heyso nuqul wixii waraaqo ah ama iimeylo ee aad dirto.

Tallaabada 3: la xirriir ACCC ama xubin kale oo saddexaad

Haddii aysan tallaabooyinka 1 iyo 2 xalin cabashadaada, waxaad weli haysataa fursado dhawr ah, ku qor bogga soo socda. Meesha ugu fiican ee aad aadeyso waxay ku xiran tahay xaaladaada. ACCC Infocentre waxay kuu diri kartaa wasaaradda dawladda ee ku haboon, ombudsman ka mihnadaas ama qorshaha xalinta muranka waxayna ku siinayaan faahfaahinta meeshaad la xirriireyso (waxaad sidoo kale ka heli kartaa faahfaahintaan website ka ah www.accc.gov.au ama buugga taleefanka).

Yaa ku caawin kara

Qorshayaasha xalinta muranka ee madax bannaan ee kale iyo ombudsman ka mihnadaan

Mihnadaha qaarkood oo ay ku jirto isgaarsiinta, adeegyada lacagta, tamarta, biyaha iyo caymiska waxay bixiyaan adeeg bilaash ah oo cabashooyin iyadoo la marayo adeega xalinta muranka ee madax bannaan ama ombudsman ka.

Xafiisyada territory-ga iyo Gobolka ee ganacsiga isticmaalayaasha cadaalada/arimaha isticmaalayaasha

Xafiiskaaga territory-ga ama gobolka ee cadaalada/arimaha ganacsiga isticmaalayaasha ayaa sidoo kale siin kara macluumaad iyo la talin isticmaalayaasha.

Maxkamadaha iyo tareybulnalka cabashooyinka yar yar

Waxaad geyn kartaa cabashooyinkaaga yar yar maxkamadaha iyo tareybulnalka gobolkaaga ama territory-ga. Waa inaad tixgelisaa helitaanka tallo sharciyeed oo madax bannaan (tusaale. Xarunta sharciga bulshada ama xafiiska caawimaada sharciga) si aad u aragtid inay tani tahay tallaabadaada ugu wanaagsan.

Tallaabada sharciga gaarka ah ee kale

Wixii murano ah ee ku lug leh lacag aad u badan, waxaa laga yaabaa inaad u geyso tallaabo sharci ah oo gaar ah oo hoos imaneysa Trade Practices Act ama sharciyada kale. Si kastaba ha ahaatee, tallaabada sharciga ahi waxay noqon kartaa mid qaali ah wax dammaanad ahina ma jirto inaad guuleysan doonto. Waa inaad hubisaa helitaanka tallo sharci oo madax bannaan.